


Bakteeriyada ku jirta kaadida dadka waayeelka ah - Maxaa dadkoo dhan qalajiye (antibiyootika) loo siin waayay?



Waa iska caadi in kaadida dadka waayeelka ah bakteeriya ku jirto iyadoo aan wax dhib ah u keenin

Qalajiyaha/antibiyootika waxay keeni kartaa saamayn xun sida shuban oo kale

Qalajiyaha/antibiyootikada waxay dishaa bakteeriya waxtar difaac inoo leh

Bakteeriyada qalajiyaha iska caabisa waxay khatar weyn ku yihiin caafimaadkeena

Ayadoo la isticmaalo qalajiye/antibiyootika markii run loogu baahdo baan ku joojin karnaa bakteeriyada qalajiyaha iska caabisa ee soo kordhaysa.